
## Hagaha taageerada saddexda- heer ah ee waaridiinta

**somali**



**GARGAAR KA SEDDEXDA HEER AH**

Ardaygu waxa laga yaabaa inuu u baahdo taageero caqabadaha sida waxbarashada, xoog saarista iyo u fiirsashada, shaqaynta, dhaqanka, nidaaminta kasbashada saaxiibada ama shucuurta/dareenka.

Saddexda heer ee taageerada waxbarashada iyo iskuul dhigashada waa **taageero guud, taageero la xoojiyay iyo taageero gaar ah.** Kuwaas, ardaygu waxa uu heli karaa hal heer oo taageero ah markiiba.

Ujeedada taageerada waa in la xoojiyo isku kalsoonaanta ardayga, dhiirigelinta waxbarashada, aqoonta la dhaqanka bulshada iyo xoojinta wax barashada barashadeeda. Waaridiinta ayaa door muhiim ah ka ciyaara taageeridda waxbarashada iyo waxbarashada ardayga.

Baahida taageerada ardayga si joogto ah ayaa loola socdaa si joogto ahna waa loo qiimeeyaa**. Jaranjarada taageerada waxaa loo isticmaali karaa labada dhinacba**.

**TAAGEERADA GUUD**

**Taageerada guud waa habka ugu horreeya ee lagu daboolayo baahida taageerada ardayga.** Tani waxay la macno noqon kartaa, tusaale ahaan, waxbaridda taageerada ah, waxbarashada gaarka ah ee waqti-kooban ah ama noocyo kale oo taageero ah oo ku habboon ardayga fasalka dhexdiisa. (tusaale barkinta fadhiga, ilaalinta maqalka, casharo kala duwan.) **Bilawga gargaarku uma baahna baadhitaan ama go'aan gaar ah.**

Doorka waaridiintu waa inay taageeraan oo ku dhiirigeliyaan ubadka ka shaqeynta casharada iskuulka , inuu la socdo dhamaystirka casharada guriga iyo inuu la xiriiro macalimiinta haddii ay soo baxaan wax walwal ah oo ku saabsan wax barashada ardayga.

**Marka ay baahida taageerada sii korodho, macalimiintu waxay ardayga ka sameeyaan qiimayn waxbarasho**. Qiimaynta waxbarashadu waxay qiimaynaysaa baahida loo qabo in loo wareego taageerada la xoojiyey.

## TAAGEERADA LA XOOJIYAY

**Taageerada la xoojiyey ayaa ah mid ka joogto badan, kala duwanaansho badan, iyo sidoo kale taageero gaar ah oo ardayga loo fidiyo**. Tani waxay la macno noqon kartaa, tusaale ahaan, taageero macalin gaar ah oo joogto ah oo siyaabo kala duwan u taageera ama waxbarid taageero oo todobaadle ah. Waxa kale oo laga yaabaa inay jiraan fursado taageero oo kala duwan oo uu heli karo ardayga fasalka dhexdiisa.

Doorka waalidku waa inuu ammaano, dhiirigeliyo oo uu ka caawiyo ilmaha shaqada iskuulka iyo cashar guriyeedka. Intaa waxaa dheer, waalidka ayaa door muhiim ah ka ciyaara diyaarinta iyo qorida qorshaha waxbarashada.

**Marka ay baahida taageerada sii kordheyso, macalimiintu waxay u diyaariyaan ardayga warbixin waxbarasho**, kaas oo dib u eegis lagula sameeyo waalidiinta. Go'aanka taageerada khaaska ah wuxuu ku salaysan yahay warbixinta waxbarashada wuxuuna sidoo kale u baahan yahay go'aan khabiir (tusaale cilmu-nafsiga iskuulka, dhakhtarka). Go'aanka kama dambaysta ah ee loogu wareegayo taageerada khaaska ah waxaa sameeya khabiiro badan (Tusaale ahaan macalinka fasalka / macalinka qaabilsan hagida wax barashada, macalinka baahiyaha gaarka ah, macalinka qaabilsan latalinta ardayda, cilmi-nafsiga iskuulka).


## TAAGEERADA GAARKA AH

**Taageerada gaarka ah waxaa loogu talagalay ardayga korriinkiisa, horay usocoshadiisa ama waxbarashadiisu u baahan tahay taageero dhamaystiran oo la qorsheeyay.** Taageerada gaarka ah waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, waxbarashada gaarka ah ee wakhti-kooban ah ama waqti-buuxa. Taageerada gaarka ah waxay awood u siinaysaa isticmaalka dhammaan noocyada taageerada ee hoos yimaada sharciga waxbarashada aasaasiga ah ee ardaygu ubaahanyahay.

Doorka waalidku waa inuu ammaano, dhiirigeliyo oo uu ka caawiyo ilmaha shaqada iskuulka iyo cashar guriyeedka. Intaa waxaa dheer, waalidka ayaa door muhiim ah ka ciyaara diyaarinta iyo qorida qorshaha waxbarashada **(Qorshaha shakhsi ahaaneed )** iyo sidoo kale qiimeeynta qorshaha waxbarashada.

**Qorshaha waxbarashada ayaa lagu diiwaangeliyaa qaababka ku habboon ee loo aqoonsaday taageerada shaqsiyadeed ee ardayga waxaana la qiimeeyaa hirgelintooda iyo ku filnaanshahooda**.

Qaab-dhismeedka taageerada saddex-geesoodka ah




1. Qiimaynta waxbarashada

2. Warbixinta waxbarashada

I. Taageerada guud

II. Taageero la xoojiyay

III. Taageero gaar ah

A. Baahida loo qabo taageerada ayaa sii kordhaysa:

B. Qaabab taageero oo kala duwan

C. Taageero joogto ah

Faahfaahin dheeri ah ka eeg bogga Guddiga Waxbarashada:

https://www.oph.fi/fi/koulutus-ja-tutkinnot/oppimisen-ja-koulunkäynnin-tuki